

Amarada Ilaalinta Khatarta Daran (Extreme Risk Protection Orders, ERPOs): Caawinta qoysaska dadka ay qaraabada yihiin dhibaataadu haysato



King County



City of Seattle

[Macluumaadka Xafiiska Xeer Ilaalinta \(King County\) iyo Xafiiska Xeer Ilaalinta Magaalada Seattle iyo Xafiiska Xeer Ilaalinta Magaalada Seattle](#)

Macluumaadkaan waxaa lagu bixiyay wadashaqeyn dhexmartay Xafiiska Xeer Ilaalinta King County iyo Xafiiska Xeer Ilaalinta Magaalada Seattle.

Ma ka walbahaarsan tahay helida qofka aad jeceshahay inuu helo hub?

Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad ka fikirto Amarada Ilaalinta Khatarta Daran (Extreme Risk Protection Orders, ERPOs) haddii qofka aad jeceshahay uu muujiyay mid ama in ka badan oo ka mid ah **hab-dhaqanada xadgudubyada** keena ee soo socda:

- Ku Hanjabo inuunaftiisa waxyeelleeyo/ku hajibay inuu isdilo
- Hanjabaad uu qofku u geysanaayo dadka kale
- Isticmaalka iyo/ama si xun u adeegsashada daroogada ama khamriga
- Dhacdooyinka rabshada qoyska
- Isbadel hab-dhaqan ahaaneed (wicitaano aan caadi ahayn ama wicitaano cusub oo dhibaato leh)
- Haddii uu leeyahay hub, waxa uu dhawaan ka hadlay iibsashada hubka ama waxa uu dhawaan iibsaday hub marka ay dhacaan mid ka mid ah dhaqamada kor ku xusan.





Yaa codsan karta amarada ilaalinta khatarta daran?

Xubnaha qoyska iyo guriga, oo ay kamid yihiin:

- Xaaska ama xaas hore
- Waalid ama ilmo
- Waalidka dhanka aabaha ama ilmaha lamaanuhu qof kale u dhalay
- Dadka qaraabada ah ee aan ka ahayn waalidka ama ilmaha
- Seedi iyo dumaashi
- Waalidka ilmaha ay wadaagaan
- Qofka hadda ama horey xiriir ula lahaa
- Lamaane qoy oo hadda ama mid hore
- Qof ay hadda ama horey meel kuwa noolaayeen sanadkii hore
- Masuulka hadda ama kii hore

AMA

Hay'ad fulinta sharciga

Muxuu samee amarka ilaalinta khatarta daran?

- Amarku wuxuu si ku meel gaar ah uga saara hubka iyo shatiga bistolada ee qarsoon **qof naftiisa ama dadka kale khatarta ku ah.**
- Garsooraha ayaa dib u eegi doona waraaqaha si uu u eeggo in xaaladaadu ay buuxinayso heerka sharciga ee ERPO.
- Qofku waa inuu isla **markiiba** hubkiisa u dhiibaa booliiska marka uu helo nuqulka amarka.
- Qofku ma lahaan karo, ma haysan karo, ma qaadan karo, mana iibsan karo hub (ay ku jirto bastoolada ruqsad qarsoon leh) ilaa **hal sano.**
- Waxaad ka codsan kartaa garsooraha inuu amarka sii shaqeeyo sanad kale haddii aad weli ka walbahaarsan tahay.

- Garsooruhu waxa laga yaabaa inuu qofka ku amro inuu sameeyo qiimayn si loo eego inay u baahan yihiin daaweynta caafimaadka maskaxda, ama si xun u adeegsashada daroogada iyo khamriga.

Ma

- Ka joojinaayo inuu qofku kula soo xariiro ama inuu yimaado gurigaaga.
- Ma ahan **fal dembi keeni kara**.

Wac qareenka amarka ilaalinta khatarta daran si aad u hesho caawimaad

- Baro xog badan oo ku saabsan ERPOs
- Buuxi warqada codsiga ERPO
- Qorsheynta Badqabka
- Gudbinta adeegyada sharciga
- Taageerada inta lagu jiro hawlaha maxkamada
- Gudbinta adeegyada bulshada
- Ku xirnaanshaha xirfadlayaal kale

*Macluumaadkana **ma ahan** talo sharci xiriir kasta oo lala yeeshana u doodaha ERPO **ma ahan mid qarsoodi ah***



206-263-9696



ERPO@kingcounty.gov

Si aad u hesho dukumiintiga ERPO, booqo

www.courts.wa.gov/forms

Raadi qaybta "amarada ilaalinta (protection orders)" oo riix "amarka ilaalinta khatarta xad dhaafka ah (extreme risk protection order)"

Haddii qof qaraabadaada ah qabo xaaladaha caafimaadka maskaxda ama xaalad caafimaad oo degdeg ah

Wac 911

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu la halgamaayo ama uu dhibaato ku jiro, la xiriir **(988 Suicide and Crisis Lifeline)** 988 ee **khadka Dhibaatooyinka iyo Isdilka**

Wac 988

Haddii adiga ama qof aad taqaano uu u baahan yahay taageero caafimaadka maskaxda, isticmaalka mukhaadaraadka, ama walaacyada shucuureed uu abo, wac **(Crisis Connections) Khadka Taleefanka ee 24-saac Wax qabashada Dhibaatada (Crisis Connections)**

1-866-427-4747

Haddii aad qof ka baqayso aadna dooneyso inuu kaa fogaado, wac **Barnaamijka u doodista Amarka Ilaalinta**

206-477-1103 (Seattle)

206-477-3758 (Kent)

Haddii aad u malayneyso in qofka aad jeceshahay uu u baahan yahay in isbitaal loo dhigo xaaladiisa caafimaadka maskaxda oowgeed, wac Shaqaalaha Loogu talagalay inuu ka jawaabo Khalkhalka (Designated Crisis Responder, DCR) ood ka wici karto **Laanta Adeegyada Fulinta iyo Wax ka qabashada Dhibaatooyinkan King County**

206-263-9200

Si aad naftaada aad u hesho caawimaad marka qofka aad jeceshahay uu la halgamaayo caafimaadka dhimirka, wac **(National Alliance on Mental Illness) Isbahaysiga Qaran ee Xanuunka Dhimirka qaabilsan.**

206-783-9264

Haddii aad dooneyos adeegyada kale ee bulshada oo ay ku jiraan guriyeynta, cuntada, kaalmada dhaqaale, macluumaadka caafimaadka, iwm.

Wac 211

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan Amarada Ilaalinta Khatarta Daran (Extreme Risk Protection Orders, ERPOs), fadlan booqo (National Extreme Risk Protection Orders (ERPOs) Resource Center) Xarunta Khayraadka Qaran ee Amarada Ilaalinta Khatarta Daran ee ah:

ERPO.org